

OGAYSIIN CANSUURAH AAN LA BIXIN

Gobolka Minnesota

Maxkamadda Degmada

<Degmada>

< Garsoorka Degmada >

Liis guryo ku yaal <DEGMADA> oo canshuuro iyo ganaaxyo aanan bixin ayaa loo gudbiyay xafiiska maxkamadda degmada. Liiskan waxaa loo soo saaray si dadka loo ogeysiyo in guryahan ay gali karaan gacanta dowladda sababo la xiriira canshuuraha oo aan la bixin..

Milkiilaha guriga, ama qofka kale ee leh dano sharci, waa inuu bixiyo canshuurta, ganaaxa, dulsaarka, iyo kharashyada, ama uu u gudbiyaa maxkamadda qoraal diidmo ah. Qoraalka diidmada waa inuu yimaadaa ugu dambeyn <TAARIKHDA> isagoo sharxaya sababaha ay canshuurta ama ganaaxa aan loogu lahayn gurigan. Haddii aysan diidmo iman, maxkamadda waxay soo saari doontaa xukun ka dhan ah guriga si looga qaado lacagaha aan la bixin.

Marka xukunka maxkamadda dhaco, muddada lagu furto hantida ayaa bilaabanaysa <TAARIKHDA>. Muddada furashada waa saddex sano, marka laga reebo dhowr xaaladood. Muddada furashada waa hal sano inta badan hantida ku taalla xaafadaha bartilmaameedka, sida ku qeexan sharciyada Minnesota, iyo xarumaha lagu tuuro qashinka guud ee magaalada. Muddada furashada waa shan toddobaad oo keliya ee guryaha qaarkood la dayacay ama banaan.

Waxaad sidoo kale geli kartaa "qirashada xukunka" oo ah hab kale oo lagu bixin karo qaddarka canshuuraha horey u dhacay loona fogaado khasaaraha hantida. Tani waxay kuu ogolaanaysaa inaad bixiso lacagta horey qeyb siman oo sanad walba la bixiyo, iyadoo lacag hordhac ah la bixinayo markaad gasho qirashada. Dhererka qorshaha qeybinta lacagta wuu kala duwan yahay: shan sano hantida ganacsiga-warshadaha/adeegga dadweynaha; 10 sano guryaha kale oo dhan.

Haddii gurigaagu yahay meel aad deggan tahay, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto barnaamijka daah-furista canshuurta ee waayeelka ah oo ka caawiya dadka da'da ah inay helaan amaah yar oo dulsaarkeedu hooseeyo., iyadoo la raacayo Sharciga Minnesota, Qeybta 290B. Barnaamiju wuxuu bixiyaa ka-dhaafista qeyb ka mid ah canshuuraha hantida iyadoo la adeegsanayo amaah dulsaar yar leh oo loogu talagalay guryaha ay leeyihii oo daggan yihii dadka jira 65 sano ama ka weyn marka la buuxiyo shuruudaha qaarkood.

Haddii gurigaagu yahay guri ay dad daggan yihii (homestead), waxaa laga yaabaa inaad u qalanto soo-celinta Canshuurta Hantida iyadoo la raacayo Sharciga Minnesota, Qeybta 290A. Soo-celintani waxay bixisaa gargaar ku saabsan canshuuraha hantida iyadoo lagu saleynayo dakhligaaga iyo canshuuraha hantida. Milkiilaha guri loo saaray inuu yahay homestead ma uusan heli karin soo-celinta Canshuurta Hantida haddii canshuuraha hantida ay dib u dhacaan.

Macluumaad ku saabsan arintani ku saabsan canshuuraha dhulka ee aan la bixin waxaa laga heli karaa xafiiska diiwaangelinta ee degmadaada, maamulka maxkamadda, ama shirkad raadin dhul.

Si aad u ogaato inta dulsaar iyo kharashyo lagu dari doono si aad u bixiso canshuurta buuxda, la xiriir Xafiiska Kormeeraha <COUNTY>, <COUNTY COURTHOUSE>, <ADDRESS>, <CITY>, Minnesota, <ZIP>. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa kormeeraha lambarkan: <PHONE> ama <EMAIL>.

<MAGACA>

(Shaabadda Maxkamadda Degmada)

Maamulaha Maxkamadda Degmada

<DEGMADA GARSOORKA>

<TAARIKHDA DIIWAANGELINTA>